

# TALLAALKA COVID-19 EE LOOGU TALA GALAY CARUURTA DA'DOODU TAHAY 5-11 SANO

120721 SOMALI

Maamulka Cuntada iyo Daawada (FDA) wuxuu oggolaaday in la siiyo tallaalka COVID-19 caruurta da'doodu tahay 5 - 11 sano. Qiyaasta tallaalka ee caruurta da'doodu tahay 5-11 sano la siinayo waa saddex meelood meel inta dadka waaweyn qaataan. Si lamid ah dadka waaweyn, caruurta waxay u baahan yihiin laba qaybood oo tallaalka ah, kuwaas oo ugu yaraan saddex todobaad udhexeeyaan.

## Waalidiintu waxay qabi karaan su'aalo iyo dareeno isku jira

In aad qaadato go'aan ku saabsan tallaalka canuggaagu waxay noqon kartaa mid aad ku wareerto. Waxaa ku caawin kara in aad wakhti qaadato, samayso liis su'aalo ah, aadna la hadasho bixiye daryeel caafimaad oo aad aaminsan tahay. Dhaqaatiirta caruurta, farmashiileyaasha, iyo kalkaalisooiyinka dugsiyada ayaa kaa caawin kara in aad su'aalahaaga jawaabo u hesho.

## Maxay tahay sababta caruurta 5-11 jirada ah loo tallaalayo?

Tallaalka COVID-19 wuxuu:

- » **Gacan ka gaysan karaa in canuggaaga ka ilaaliyo in uu ku dhaco** fayraska COVID-19
- » **Ka ilaalinayaa canuggaaga inuu si daran ula xanuunsado** xattaa haddii uu COVID-19 ku dhaco
- » **Ku haynayaa canuggaaga dugsiya lana yareeyo caqabadaha ka imaanaya daryeelka canugga.** Caruurta sida buuxda u tallaalan uma baahna in la karantiilo haddii ay ka agdhawaadaan qof COVID-19 qaba haddii aanu calaamado yeelanin
- » **Wuxuu yaraynayaa fursadda uu COVID-19 ugu faafi karo dadka kale**

## Tallaalada COVID-19 ma yihiin kuwo ammaan u ah caruurta?

Tallaalka Pfizer waxaa la siiyay malaayiin dad waaweyn ah iyo caruur da'doodu u dhaxayso 12 sano iyo kasi weyn.

- » Tijaabo lagu sameeyay ku dhawaad 3000 oo caruur ah, **tallaalka COVID-19 waxaa la ogaaday in uu yahay mid ammaan ah waxna ka taraya** ka hortagga caabuqyada COVID-19 ee caruurta da'doodu tahay 5-11 sano.
- » Ma jirin **wax saamayno xunxun ah oo waaweyn** oo tallaalka kasoo gaaray kooxda da'ahan jirta. Xarunta Kahortagga iyo Xakamaynta(CDC) iyo FDA waxay sii wadayaan in ay si dhow ula socdaan tallaalka una dabo galaan wax kasta oo saamayn xun ah oo lasoo sheego.
- » **Xaddi yar oo 10 microgram ah** ayaa ku filan waxtarna u leh caruurta da'doodu tahay 5-11 (xaddiga dadka waa weyn waa 30 microgram).
- » Tallaalka caruurta waxaa dib u **eegis ku sameeyay ogolaadayna** FDA, iyo CDC, iyo Western States Scientific Safety Review Workgroup.

Myocarditis (caabuqa wadnaha) waa xaalad dhif iyo naadir ah, laakiin khattar ah, taasoo ku dhacday qaar kamid ah da'yarta iyo dadka waaweyn ee dhalinyarada ah (1 qof 50,000 ee qofba) kadib markii ay qaateen tallaalka COVID-19. Majiro mid kamid ah 3,000 ee caruurta ah ee tijaabada lagu sameeyay kuwaas oo da'doodu udhaxaysay 5-11 oo ay ku dhacay myocarditis kaddib marka ay tallaalka qaateen. Myocarditis waxaa loo malaynayaa inaanu ku badnayn caruurta yaryar kaddib marka ay qaataan tallaalka COVID-19 ayada oo sabab u tahay xaddiga yar ee tallaalka ah ee ay qaadanayaan.



## Maxaa ay yihiin saamaynaha xunxuni?

- » Saamaynta xunxuni waa kuwo caadi ah in ay dhacdo kaddib marka tallaalka la qaato taasoo muujinaysa in jirku borotiino samaysanaayo.
- » Xaddiga yar ee 10 microgram awgii, saamaynaha xunxun ee la arkay kaddib qaybta labaad waa ay yar yihiin—qandho yar, qarqaryo yar—marka la barbardhigo caruurta waaweyn.
- » Saamaynaha xunxun ee ku badan caruurta da'doodu tahay 5-11 waxaa kamid ah nabaro, gacmaha ah oo guduuta, barara ama xanuun yeesha, daal, madax xanuun, murqa xanuun, qarqaryo, qandho, ama lalabo. Inta badan saamaynaha xunxun waa ay ka baaba'ayaan dhowr maalmood kaddib.
- » Waa dhif iyo naadir, laakiin dadka qaarkiis waxay ku yeesheen xassaasiyad daran tallaalka. Dadkan oo dhammi waxa ay heleen gargaar caafimaad isla markiiba.



## Tallaalka COVID-19:

- » **Kuma jiro** coronavirus canuggaaguna kama qaadayo COVID-19.
- » **Ma** badalayo DNA-da canuggaaga ama hidde-sidihiisa, lagumana kaydinaayo DNA-da.
- » **Ma sababo** madhalaysnimo.
- » Soosaarista tallaalka waxaa lagu saleeyay cilmibaaris dhowr sano socotay.

	Dadka waaweyn (12+)	Canug (5–11)
<b>Xaddiga lagu Mudayo</b>	30 microgram	10 microgram
<b>Tirada qaybaha tallaalka</b>	2	2
<b>Tirada todobaadyada u dhexeeya qaybta laad iyo qaybta 2aad</b>	3 todobaad	3 todobaad

*Tijaabooyinkaan caruurta qaadatay xaddiga yar ee tallaalka waxay yeelanayaan heer difaac oo ka difaacaya fayraska kaasoo lamid ah dadka da'doodu tahay 16 ilaa 25 sano.*

## Xagee caruurta ka heli karaan tallaalka?

- » Tallaalada caruurta ee COVID-19 waxaa laga heli karaa goobaha sida farmashiyada, xafiisyada dhaqaatiirta, dugsiyada, iyo isbitaalada kale ee laga helo tallaalada ee bulshada.
- » Waxaad sidoo kale fiirin kartaa:
  - » [Getvaccinated.oregon.gov](https://getvaccinated.oregon.gov)
  - » [Vaccines.gov](https://vaccines.gov)
  - » Xarumaha Caafimaadka Ardayda ee Degmada Multnomah - [multco.us/health/student-health](https://multco.us/health/student-health)
  - » Wac 2-1-1 haddii aad u baahan tahay kaalmo dheeraad ah (tarjumaano ayaa diyaar ah)